



Su'aalaha Badanaa la Iska Waydiiyo Hagida Dib u Furida

Kaamamka Maalinta ee Wakhtiga Xagaaga ee Carruurta Da'da Dugsiga (la cusboonaysiiyey 5/22/2020)

Waayoaragnimada Ardayga

S1: Waa maxay astaamaha ugu badan ee xiliga diiwaangalinta ee ilmaha u diidi karta kaqaybqaadashada? Ma hal astaambaa? Ma qaab kala sarreeyaa? Isku darka astaamo badan oo ah kuwa aan badanaa la xiriirin cudurka oo isla mar la xaqiijiyay?

J1: Ilme ama shaqaale kasta oo leh **mid** kamid ah astaamaha soo socdaa waa inaanu kaqaybqaadan kaam: xummad (ka badan ama la mid ah 100.4F), qufac, neefta oo qofka ku yaraato, ama neefsiga oo ku adag. Haddii aysan jirin xummad ama astaamaha xanuunada neefmareenka, qof kasta oo qaba **laba** kamid ah kuwa soo socdaa waa in gaar loo saaro: qarqaryo ama gariir, xanuun murqaha ah, madaxanuun, cune xanuun, ama dhadhanka ama urta oo ka dhunta. Ugu dambayn, iyadoo la raacayo talooyinka guud ee kaamamka ama dugsiyada, cid kasta (shaqaale ama ilme) oo qabta matag ama shuban waa inaanay kaqaybqaadan ilaa ay ugu yaraan 24 saacadood ka soo wareegtay markii astaamahani joogsadeen.

S2: Miyey tahay waalidiinta in la siiyo ikhtiyaarka maalin buuxda (7 g.h.- 6 g.d.) oo loogu talagalay daryeelka xagaaga mise waxa kaliya la siinayaa ikhtiyaarka maalin barkeed (7 g.h. - 12 g.d., 1 g.d. - 6g.d.) iyadoo kusalaysan xogta u baylaha?

J2: [Hagitaanka OHA](#) wuxuu saamaxayaa ikhtiyaarada maalin buuxda iyo maalin barkeed labadaba. Waa shaqo u taala waalidiinta ikhtiyaarka ay dooranayaan.

Jadwalka

S1: Barnaamijyada xagaaga ayaa la furi doonaa laakiin Degmada Multnomah may dabbaqin weli Marxaladda Koowaad. Sidee ayey tani u saamayn doontaa dugsiyada SUN ee degmada?

J1: Kaamamka xagaaga iyo dugsiyada xagaaga, sida dugsiyada SUN, waxay heleen hagitaanka dib u furidda ee gobolka oo dhan, laga bilaabo Maajo 15, iyadoon la eegin marxaladda degmada deegaanka.

S2: Maadaama ay Marxaladda Koowaad furmayso 15-ka Maajo, miyey tahay inaynu galno Marxaladda Labaad 5-ta Juun? Miyuu jiri doonaa faraq u dhexeeya qawaaniinta kaamka?

J2: Degmadooyinka ku jira Marxaladda Koowaad waa inay sugaan ugu yaraan 21 maalmood oo ayna la kulmin sare u kicid ku timaada xaaladaha COVID-19 kahor inta ayna u guurin Marxaladda Labaad. Wakhtigan la joogo, ma jiraan isbaddalo la qorsheeyay ee loogu talagalay qawaaniinta kaamka ee Marxaladda 2-aad.

S3: Tilmaamaha ugu dambeeyaa waxay muujinayaan in kaamamka habeenkii loo hoydo aan la oggolayn “wakhtigan.” Aad ma u sii waadixin kartaa goorta ama in kaamamka habeenkii loo hoydo la oggolaan karo xagaagan iyo in kale, iyo waxa ay yihiin shuruudaha loo baahan yahay si halkaas loo gaaro? Ma saadaalin karnaa inaan kaamamka habeenkii xagaagan la furi doonin?

J3: Xafiiska Gubanatooraha iyo Maamulka Caafimaadka Oregon waxay ka wada shaqaynayaan go'aaminta haddii kaamamka habeenkii loo hoyda la oggolaan karo marxalad dambe, laakiin ma jirto taariikh cad ama shuruudo dheeraad ah oo ka yaala wakhtigan.

S4: Ma saadaalin karnaa inay isbaddalo iman doonaan inta lagu jiro xagaaga ama in wax laga baddali doono tilmaamahan marka aynu galayno marxalado cusub?

J4: Wakhtigan la joogo, ma jiraan isbaddalo dheeri ah oo la filan karo oo ku imanaya kaamamka maalintii marka aynu galayno marxaladaha cusub. Tani waxa sii wadi doona inay dib u eegaan Maamulka Caafimaadka Oregon.

S5: Miyey tilmaamahani saamayn doonaan barnaamijyada la qabto dayrta (kadib Sibtambar 1)?

J5: Haa, wakhtigan la joogo tilmaamahani way saamayn doonaan barnaamijyada la qabto dayrta. Taasi way isbaddali kartaa marka aynu wax badan ka sii barano fayraska ama intaynu sii wadno qiimaynta xaalada degmooyinku gobolka oo dhan mudada marxaladaha.

S6: Haddii aan si sax ah u akhrinayo tilmaamaha, kaamamka waxa la oggol yahay inay ka furmaan xiitaa degmooyinka aan wakhtigan kujirin Marxaladda Koowaad. Hase yeeshee, haddii ay kujiraan Marxaladda Koowaad, miyaa xadadka loo dhigay kooxda ee 10-ka qof ah wali ka shaqaynayaa kaamamka?

J6: Haa, xadka kooxda ee 10-ka carruur ah ee kaamamka xagaagu ayaa shaqaynaya iyadoon la eegin marxaladda degmadu ku jirto.

Habeendhax

S1: Maxaa kaamamka habeenkii loo hoyanayo looga saaray qoraalkii u dambeeyey? Iyo iyadoo aan talo lagu darsan go'aan kama dambays ah kahor?

J1: Marka ay timaad dib u furidda kaamamka xagaaga ee Oregon, badbaadada carruurta Oregon (iyo sidoo kale shaqaalaha la socda) ayaa ah meesha aanu isha aad ugu hayno. Dib u furidda kaamamka xagaaga Oregon, iyadoo la eegayo badbaadada carruurta iyo shaqaalaha ku lugta leh, waxa la go'aamiyey in la oggolaado kaliya hawlgallada maalintii tallaabada koowaad ahaan. Wada hadal ayaa nooga socda sida si badbaado leh hawlgallada habeenkii loogu bilaabi karo.

S2: Sidee loo qaadan doona go'aanka ah in kaamamka habeenkii la furo? Ma jiraan shuruudo cayiman oo ay tahay in la buuxiyo gobolka oo dhan?

J2: Xafiiska Gubanatooraha (GO) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa ka wada shaqayn doonaa go'aaminta haddii iyo goorta ay badbaado u leedahay carruurta iyo shaqaalaha inay dib u furaan xarumaha kaamka habeenkii loo hoydo. Haddii tilmaamo cusub la soo saaro, OHA iyo GO waxay ka codsan doonaan ra'yi dadka ay tilmaaamaha saamaynayaan

S3: Maxay tahay inay dhacaan ama diyaar ahaadaan si loo oggolaado? Kaamamka habeenkii loo hoydo waxay u baahan yihiin qorshayn iyo agaasimid aad u badan, waxaanu iswaydiinaynaa fursadaha u yaala kaamamka habeenkii xagaagan, iyo muddada ogaysiis ee aanu heli doono haddii la oggolaanayo.

J3: Xafiiska Gubanatooraha iyo Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa wada hadal uga socda sida hawlgallada habeenkii si badbaado leh dib loogu bilaabi karo. Haddii tilmaamaha Marxaladda Koowaad ay gacan ka gaysanayaan joojinta faafidda fayraska, waxaannu dib u eegi doonaa haddii aanu soo saarayo tilmaamo cusub oo kusaabsan baadqabka hawlgallada habeenkii ee kaamamka xagaaga toddobaadyada soo socda.

S4: Miyey jiri doontaa taageero dhaqaale oo loogu talagalay kaamamka ku tiirsan barnaamijyada kaamamka habeenkii loo hoydo ee xcagaagii?

J4: Wakhtigan, ma jirto lacago gobol oo ku filan oo lagu bixin karo taageero dhaqaale oo si gaar ah loo siiyo kaamamka xagaaga. Mulkiilayaashu waxay la shaqayn karaan Oregon's [Small Business Navigator](#) si ay u go'aamiyaan taageerooyinka jira ee ay heli karaan barnaamijyadu.

S5: Waxaa marnaba macquul ahayn fikirka ah in la joogteeyo kooxo tiro sughan iyadoo dhinaca kalena aanu fasaxayno xubnaha kooxdu (ardayda iyo shaqaalaha kaamka) inay ku soo laabtaan galin dambe/fiid kasta guryahooga oo ay joogaan kooxo aan tiro sugnayn.

J5: Fikirka ayaa wuxuu yahay haddii ilme laga helo COVID-19, wixii shaqaale ama arday kale ah ee u baylahay ilmahaas labadii maalmood ee ka horreeyay intii astaamuhu ayna bilaabmin ay tahay sidoo kale in la karantiilo muddo 14 maalmood ah. Markaa, qof kasta oo ka tirsan kooxda tirada sugan iyo macallinka waa in la karantiilo, oo waalidiinta ilmaha u baylahay cudurka waa inay guriga joogaan si ay u daryeelaan ilmahooga u baylahay cudurka ee karantiilka kujira.

Hase yeeshee, haddii qofka COVID-19 qabaa uu kaqaybqaatay dhawr hawl kooxeed oo kala duwan laba maalmood kahor astaamaha, markaa carruur iyo shaqaale badan ayey tahay in la karantiilo. Joogtaynta koox yar oo tiro sugan, waxay kaamamka xagaagii ka fogayn kartaa in arday iyo shaqaale badan ay ka reebaan kaamka muddo 14 maalmood ah haddii qof laga helo COVID-19.

S6: Waa maxay tilmaamaha kaamamka kiniisaddu ay raacayaan haddii ay bixiyaan kaamam habeenkii loo hoydo iyo adeegyo cunto ay goobta ku bixiyaan?

J6: Lama oggola kaamamka habeenkii loo hoydo wakhtigan.

Bannaanka

S1: Ma u isticmaali karnaa beeraha nasashada bulshada kaamam ahaan?

J1: Haa, mid kasta oo kamid ah beeraha deegaanka oo furan ayaa loo adeegsan karaa kaam ahaan. Wareeg ah ugu yaraan 75 fuudh halkii qofba waa in la heli karaa marka la adeegsanayo barxadaha bannaanka. Iyadoo la raacayo [tilmaamha OHA ee madadaalada bannaanka](#), aagagga la isticmaalo maalintii ee soo jiidan kara dad badan (oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidnayn garoomada ciyaarta, hoyga/dhismeyaasha lagu cunteeyo xiliga madadaalada, barkadaha biyaha iyo barkadaha dabbaasha, iyo garoomada isboortiyada ee loogu talagalay isboortiyada leh istaabasho jireed sida kubbadda koleyga) way sii xirnaanayaan.

S2: Miyaa laga yaabaa in barkadaha la furo dhammaadka xagaaga? Sida furidda barkadaha oo lagu oggolaado Marxaladda Labaad ama Saddexaad?

J2: Ma jirto taariikh cad ama shuruudo dheeraad ah oo ku xiran barkadaha wakhtigan.

S3: Ma jiraan ka dhaafidyo ku aaddan barkadaha leh dareemidda wasakhda ee kalooriin oo joogto ama awoodo dib isku habayn?

J3: Wakhtigan la joogo, ma jiraan wax ka reebitaano oo loogu talagalay furida barkadaha. Ururada ka shaqaysta jidh-dhiska waxa looga baahan yahay inay xiraan qolalka uumiga qallalan, qolalka uumiga qoyan iyo barkadaha biyaha kulul. Intaa waxa dheer, ururada ka shaqaysa jidh-dhiska waxa looga baahan yahay inay barkaduhu ka xiraan hawlaha dabbaasha ee madadaalada ah, casharrada dabbaasha, iyo dhammaan hawlaha biyaha la xiriira ee kale.

S4: Haddii kaam uu leeyahay barkad gaar u ah, ma isticmaali karaa? Waa maxay faraqa u dhexeeya isticmaalidda barkaddaada gaarka kuu ah iyo haro? Haddii aanu kala fogaano marka la joogo harta dhexdeeda, miyaanuu sidoo kale hal koox oo tiro sugan ah markiiba ku sii dayn karin barkadda anagoo wali dhawrayna masaafada lixda (6) fuudh, iyo iyadoo ay jirto kalooriin jeermiska dilaysaa? Ma jirtaa qaab loogu heli karo tani ka dhaafid?

J4: Wakhtigan la joogo, ma jiraan wax ka reebitaano oo loogu talagalay furida barkadaha. Ururada ka shaqaysta jidh-dhiska waxa looga baahan yahay inay xiraan qolalka uumiga qallalan, qolalka uumiga qoyan iyo barkadaha biyaha kulul. Intaa waxa dheer, ururada ka shaqaysa jidh-dhiska waxa looga baahan yahay inay barkaduhu ka xiraan hawlaha dabbaasha ee madadaalada ah, casharrada dabbaasha, iyo dhammaan hawlaha biyaha la xiriira ee kale.

S5: Ka waran kaamka Boy Scout Troops Camping ee iskooda ah?

J5: Iyadoo la raacayo [tilmaamaha OHA](#), lama ogola in kaamamka habeenkii la furo ama ay shaqeeyaan waqtigan.

S6: Miyaa kaamamka duurka/tacaburka ee habeenkii loo hoyanyo la oggol yahay (haddii ardayda qof kastaa uu seexanayo taandhooyin gaar ah)?

J6: Iyadoo la raacayo [tilmaamaha OHA](#), lama ogola in kaamamka habeenkii la furo ama ay shaqeeyaan waqtigan.

S7: Haddii kaam soo jireen ah uu mid qoys noqon karayo, oo dadkuna ay kala fogaanayaan oo aanu barnaamij jirin, taas ma la oggol yahay? Miyuu kaam ah kuwa la dego ee soo jireenka ah uu noqon karayaa mid qoys, kaasi oo ay dadku kala fogaanayaan lana isticmaalayo aagga maalintii kaliya, barnaamijyaduna ay yar yihiin ama aanay jirin?

J7: Kaamamku waxay u adeegsan karaan kaamkooda mid qoys, kaasi oo dadku ay kala fogaanayaan, oo aan lahayn barnaamijyo, oo ay cuntadu kujirto. Kaamamkani waa inay tixraacaan [Tilmaamaha Madadaalada Bannaanka](#). Kaamamka habeenkii loo hoyanayo ee xubnaha qoysas kala duwan, gaar ahaan iyadoo aanu jirin qof wayni oo ka socda qoys kasta, wuxuu u qalmi doonaa kaam habeenkii loo hoydo. Iyadoo la raacayo [tilmaamaha OHA](#), lama ogola in kaamamka habeenkii la furo ama ay shaqeeyaan waqtigan.

Shaqaalaha

S1: Waan fahamsanahay tilmaamaha shaqaalaha la shaqaynaya guutooyin/kooxo fara badan, hase yeeshee waxaan u malaynayaa shuruuduhu inayna suurtoagal ahayn xaaladaha qaarkood. Haddii afsaabku uu keenayo caqabad ama mushkilad badbaado, isagoo ku yeelanaya saamayn taban carruurta, ma waxay tahay in la xirto mise waaba shardi?

J1: OHA waxay ku talinaysaa in afsaabka ama daboolka wajiga la xirto mar kasta oo kala fogaanta dadku ayna suurtagal ahayn ilaa qaabilaad ay tahay in la sameeyo ma ogiye sababtoo ah qof ayaa naafo ah ama xaalad caafimaad qaba taasi oo u diidaysa isticmaalka afsaab ama daboolka wajiga.

S2: Miyey tabaruceyaashayaga dhalinta ah (aan lacagta qaadan da'dooduna tahay 11 ilaa 15) loo xisaabiyaa shaqaale ahaan? Ma yeelan karaa 1 macallin, 1 dhalinyar ah iyo 10 carruur ah?

J2: Tabarucayaasha, iyadoon la eegin da', looma xisaabiyo kooxda tirada sugan ee 10-ka qofka ah.

S3: Imisa qof oo shaqaale ah ayaa lagu dari karaa hal koox oo tiradoodu sugan tahay?

J3: Ma jiro shardi saami oo sheegaya shaqaalaha kooxaha tiradoodu sugan tahay haddii marba ilaa iyo intii suurtagala ah ay shaqaaluhu awoodaan inay la joogaan isla kooxdu caruurta ah ee tiradoodu sugan tahay.

S4: Taariikh ahaan waxaynu bixin jirnay daryeelka ilmaha 5 g.h. - 8 g.h. (kahor daryeelka) iyo haddana 2 g.d.-6 g.d. (kadib daryeelka). Waxaan arkaa in hagitaanku ku socda ardayda, laakiin waa maxay hagitaanka loogu talaglay shaqaaluhu? Sida iska cad, na lama joogi karaan isla shaqaalaha laga bilaabo 5 g.h.-6 g.d.

J4: Kooxaha tiradoodu sugan tahay waa in ay ka koobnaadaan isla ka-qaybqaateyaasha inta lagu gudo jiro wakhtiga daryeelka kahor, inta lagu gudo jiro maalinta kaamka, iyo inta lagu gudo jiro wakhtiga daryeelka ka dib. Ka-qaybqaatayaashu waa in ay had iyo jeer ku jiraan kooxo xasiloon, xitaa haddii ay ku jiraan mid keliya oo ka mid ah iyaga ka hor ama ka dib daryeelka. Isla shaqaale waa inuu la joogaa ardayda kaamka ilaa intii suurtagal ah. Marka la eego jadwalka fidsan, oggolaanshaha in shaqaale kala duwan uu taageero bixiyo kahor iyo kadib daryeelka ayaa noqon karta macquul. Nidaamyada shaqaalaha aan sugnayn waa in la isticmaalo xaaladahan.

S5: Ma jirtaa maalgalin dheeraad ah oo loo hayo in lagu taageero kharashka shaqaalaha ee sii kordhaya, nadaafadda dheeraadka ah ee la rabo, iyo kharash dheeraad ah oo loo hayo gaadiidka si loo hubiyo kala fogaanshaha dadka?

J5: Wakhtigan la joogo, ma jirto lacag lagu bixinayo kharashaadka kaamamka xagaaga ee ay suurtagalka tahay inay kordhaan.

Nadaafinta & Jeermis-dilista

S1: Halkee ayaanu u gudbinaa qorshayaashayada maaraynta cudurrada faafa? Hay'adda caafimaadka deegaankayga mise cid kale oo OHA joogta?

J1: Kaamamka xagaaga waxa looga baahan yahay inay abuuraan qorshaha maaraynta cudurrada faafa, laakiin uma baahna inay u gudbiyaan maamulka caafimaadka dadwaynaha deegaanka, OHA, ama cid kale.

S2: Ma jiraa tusaalaha qorshaha xaaladda degdegga ah? Ama Liiska Hubinta?

J2: Ururka Xanaanaynta ee Kaamamka wuxuu leeyahay khayraadyo badan, oo ay kujiraan [tilmaamaha maaraynta cudurrada faafa](#).

S3: Ma jirtaa cid aanu ka wada shaqayn karno qorshayaasha kaamka maalintii ee baddiilka ah si aanu u hubino inaanu ku dhaqmayno tilmaamaha si aanu u ilaalino badbaadada carruurta iyo ardayda?

J3: Nasiib darro, ma jirto hay'ad awood u leh inay dib u eegto qorshayaasha wakhtigan la joogo. Waxaad sii wadi kartaa inaad su'aalo kusaabsan dib u furidda u dirto covid19.reopening@dhsosha.state.or.us si loogu daro Su'aalaha Badanaa la lswaydiyo ee mustaqbalka (FAQs).

S4: hagitaanku wuxuu sheegayaa in dadka laga yaabo inay u baylaheen COVID-19 gaar loo saaro, laakiin waxba kama sheegayo cudurrada kale ee faafa. Waa maxay hagitaanka kuwaasi? Miyaa sidoo kale lanaga filayaa inaanu kuwaasi baarno?

J4: Hagitaankani wuxuu gaar u yahay hawlgallada inta aafada COVID-19 ay socoto. Kaamamka xagaagu waa inay sii wadaan raacista qorshayaasha iyo nidaamyadooda maaraynta cudurrada faafa.

S5: Maxay tahay in looga warbixiyo Maamulaha Caafimaadka Dadwaynaha Deegaanka (LPHA)? Goorma ayaa warbixin la siinayaa LPHA? Tusaalaha: Qof dhalin ah ayaa bukooday xilligii barnaamijka, astaamaha oo dahnna uma eka kuwa COVID-19. Miyey tahay in tan looga warbixiyo LPHA? Goorma ayaa warbixin la siinayaa LPHA?

J5: Haddii qof soo galay xarumaha waxbarasho laga helo COVID-19, ku wargeli kiiska LPHA 24 saacadood gudahood kana hel talo ku saabsan nadiifinta iyo suurtagalnimada xidhitaanka fasalka ama dugsiga. U sheeg maamulka caafimaadka dadwaynaha deegaanka wixii xanuuno ah (sida astaamaha qufaca, xummadda, matagga ama shubanka, ama finanka) ee haya shaqaalaha ama ardayda xarunta waxbarasho.

S6: Qofka dhalinta ah ee bukooda inta barnaamijku socda waa in la takooro ilaa uu soo doono oo uu qaado daryeeluhu. Miyey tahay qofka dhalinta ah in lagu hayo barxadda barnaamijku ka socdo ama ma in la geeyaa meel kale?

J6: Waxa aad u muhiim ah in qofka dhalinta ah ee astaamaha leh gaar looga saaro kuwa kale, waliba waxa fiican qol gaar ah sida xafiiska ama qol kale oo aanay dadka kale ee kaamku hadda adeegsanin in la geeyo. Ikhtiyaar kale, haddii ilmuhu caafimaad dareemayo, waa in qof shaqaale ah kula sugo ilmaha dibadda meel ka baxsan dadka kale ee kaamka jooga ilaa ilmaha wixii qaadi lahaa yimaaddo.

**S7: Miyey tahay kooxaynta tirada sugan in lagu sameeyo guuto da'eedyada?
Miyey tahay in carruurta walaalaha/isku qoyska ah in meel lagu wada hayo?
Miyey tahay in carruurta da'da dugsiga ee isku qoyska ah laga dhigo isku
koox mise waxa fiican in lagu kala daro kooxaha da' ahaan isku habboon?**

J7: Adiga ayaa go'aamin kara oo siyaasadana u samayn kara sida aad u qaabaynayso kooxaha tirada sugan ah.

S8: Miyey kooxaha kala duwan ee tirada sugan awood u leeyihiin inay suuli wadaagaan? Miyaa dadwaynaha lala wadaagi karaa?

J8: Haa, kooxaha kala duwan ama dadwaynuhu waxay isticmaali karaan suuliga laakiin hal koox oo kaliya markiiba ayaa isticmaali karta suuliga. Shaqaaluhu wuxuu u baahan yahay hubinta tirada carruurta galaysa ee isticmaalaysa suuliga inay xaddidan yihiin si loo oggolaado jiritaanka kala fogaanshaha dadka oo ku filan marka gacmaha la dhaqanayo.

S9: Miyey laba kooxood oo tiradoodu sugan tahay wadaagi karaan hal suuli? Haddii ay sidaas tahay, meeqa jeer ayuu suuligu u baahan doonaa in la nadiifiyo?

J9: Haa, laakiin waa in hal koox oo tiradoodu sugan tahay oo carruur ah ay isticmaalaan suuliga markiiba. Dhaqanada nadiifinta waa in la raaca kadib marka ay koox isticmaasho goobahan iyo kahor inta aysan koox kale isticmaalin.

S10: Maxaa lagu talinayaa nadiifinta dhulka/sibidhka? Nadiifin iyo jeermis ka dilid maalin kasta ah miyaa? Miyey tahay in carruurta kabaha dibadda ay iskaga bixiyaan oo xirtaan kabaha gudaha kaamka?

J10: Dhulka waa in loo nadiifiyo sidii caadiga ahayd. Iska bixinta kabaha inta qofku aanu gudaha soo galin waa dhaqan wanaagsan oo yaraynaya keenista boodhka iyo waxyaalaha sida faxalka iyo curiyaha lead. Hase yeeshee, lama oga qaab kabuhu ku faafiyaan COVID-19. Maareeyaasha kaamku ma aha inay tallaabooyin taxaddar oo gaar ah ka qaadaan tan.

Dhulka waxa loo nadiifin karaa sidii barigii ka horraysay COVID-19 loo nadiifin jiray oo kale. Hase yeeshee, waxaanu ku talinaynaa nadiifin joogto ah meelaha taabashadu ku badan tahay ee aadka loo isticmaalo. Kuwan waxa kamid ah miisaska, kuraasta, boombalayaasha, qalabka la wadaago, gacmaha albaabada, gacmaha qasabadaha madbakha iyo xamaamka, iwm. Maareeyaasha kaamku waxay dooran karaan inay nadiifiyaan ka badan halmar maalintii iyadoo ku xiran baahida.

Jeermis-dile ku jira [liiska ay ansixisay Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka \(US Environmental Protection Agency \(EPA\)\)](#) ayay ah in loo isticmaalo nadiifinta dhulka iyo oogoooyinka.

S11: Haddii aanaan heli karin nadiifiyaha gacmaha, way adkaan doontaa inaanu furno haddii aanaan siin karin kuwan ardayda iyo shaqaalaha. Waa maxay talooyinka helitaanka nadiifiyaha gacmaha?

J11: Wakhtigan la joogo, ma jiraan meelo laga helo nadiifiyayaasha gacmaha oo u gaar ah kaamamka xagaaga oo gobolku ogyahay. Waxaad ka eegi kartaa [barta Oregon Supply Connector](#) macluumaad dheeraad ah.

S12: Waa maxay qawaaniinta gaarka u ah gawaarida qafilan ee 15-ka qof qaada? Miyey kooxda tirada sugan ee 10-ka qof ka kooban noqon kartaa koox ka kooban 10 qof oo kala duwan maalin kasta toddobaadkiiba (ka joogteynta kala fogaanshaha 3-da fuudh ah gaariga dhexdiisa)?

J12: Ka-qaybgalayaasha iyo shaqaaluhuba waa in aanay la safrin dadka kale ee ka baxsan kooxdooda xasiloon. Kooxaha tirada sugan waa in carruurta isla kuwii hore uun yihiin maalin kasta. Haddii guuto 10 carruur ah ay wada socdeen Isniinta, waa inay isla iyagaa wada socdaalaan inta lagu jiro barnaamijka toddobaadkaasi. Shaqaalaha kaamku waa in ay diiwaan geliyaan magaca kooxda(aha) xasilan iyo shaqaalaha oo ay ku jiraan darawalka, oo ay la socdaan taariikhda iyo waqtiga safarka iyo lambarka gaadhiga/liisanka.

Dareewaladu waxa ay qaadi karaan kooxo xasiloon oo badan haddii ay xidhan yihiin maaskaro oo ay gacmaha jeermiska ka dilaan ka hor iyo ka dib koox wal oo xasiloon kaxaynteeda. Gawaadhida waa in la nadiifiyaa inta u dhaxaysa koox kasta oo arday iyo shaqaale ah iyada oo la raacayo [tilmaamaha gaadiidka](#).

Noocyada Barnaamijyada

S1: Sidee ayey tani ula xiriirtaa Fasaxa Dugsiga Masiixiga ee Kiniisadda (VBS), habeenada/dhacdooyinka kooxda dhalinta iyo safarrada yoolka?

J1: Church VBS waa inay raacaan [tilmaamaha OHA ee loogu talagalay Kaamamka Maalintii ee Xagaaga ee Carruurta Da'da Dugsiga](#). Lama oggola kaamamka habeenkii loo hoydo wakhtigan.

S2: Wali waxay u muuqataa inuu xaalku yahay in Barnaamijyada Diiwaangashan ee Carruurta Da'da Dugsiga ay tahay inay dalbadaan sidii iyagoo ah Daryeelka ilmaha ee Xaaladda Degdegga ah oo ay ku dhaqmaan tilmaamaha daryeelka ilmaha, laakiin waa maxay dabacsanaanta aan haysano marka aan raacayno hagitaanka kaamka xagaaga, iyadoo ay meesha taallo in hagitaanada kaamamka xagaagu u muuqdaan kuwa waadix ah oo xooggan?

J2: Barnaamijyada Diiwaangashan ayaa loo oggolaaday inay dalbadaan loona ansixiyaa inay ka hawlgalaan barnaamijyada Daryeelka ilmaha ee Xaaladda Degdegga ah. Tilmaamaha kaamka xagaaga iyo daryeelka ilmaha (iyo dokumentiyada tilmaamaha ee dheeraadka ah ee Daryeelka ilmaha ee Xaaladda Degdegga ah) way iswaafaqsan yihiin mana aha heerar loogu talagalay daryeelka carruurta da'da dugsiga oo iska hor imaanayo. Barnaamijyada looga baahan yahay inay isku diiwaangaliyaan sida bixiyaha Daryeelka ilmaha ee Xaaladda Degdegga ah waa inay aqoon u leeyihiin hagitaanka ay bixiso Qaybta Waxbarashada Hore si ay u taageeraan hawlgallada barnaamijka.

Kaamamka maalintii waa ka geddisan yihiin daryeelka ilmaha; hase yeeshee, haddii koox u hawlgalayaan sidii iyagoo ah Xarunta Daryeelka

Ilmaha ee Xaaladda Degdegga ah, waa inay raacaan [hagitaanada iyo shuruudaha daryeelka ilmaha](#).

S3: Haddii aanu iskaga diiwaangalino gobolka inaanu nahay barnaamijka dugsiga Kadib, miyey khasab tahay inaanu dalbano inaanu noqono Daryeelka Ilmaha ee Xaaladda Degdegga ah (Emergency Child Care, ECC) si aanu uga hawlgalino kaamka xagaaga?

J3: Haddii aad caadi ahaan ugu hawlgasho barnaamij diiwaangashan ahaan markaa waxa lagaa rabaa inaad isku diiwaangaliso ECC ahaan, sida ay dhigayaan Isbaddalada Kumeel Gaarka ah ee Xeerarka Daryeelka Ilmaha ee la soosaaray Abriil 24, 2020 [ee halkan ku xiriirsan](#)

S5: Kaamkayaga Maalintii waxa lagu qabtaa xero wayn wuxuuna siiyaa kaam carruur da'doodu u dhaxayso kuwa kujira fasalka 3-aad ilaa 9-aad. Miyey jirtaa wax aanu si gaar ah u samayn karno maadaama ayna dhammaan ardayda kaamka barbaarinta ku jirin, mise waxaanu iska raacnaa uun tilmaamahan gobolka?

J5: Kaamamka xagaagu waxay kaliya u adeegaan carruurta da'da dugsiga wakhtigan, carruurta ka yar 5 jirku waa inay kujiraan xarumaha daryeelka ilmaha ee caadiga ah.

S6. Waa Maxay Barnaamij Diiwaangashan?

J6: Waxa jira laba nooc oo ah barnaamijyada diiwaangashan. Barnaamijyada Diiwaangashan ee Dugsiyada Xannaanada, kuwaasi oo u adeega carruurta 36 bilood ilaa 5 sano jirka ah, aasaas ahaan waa waxbarasho mana jiro ilme xarunta ku sugnaanaya in ka badan afar (4) saacadood maalintii. Barnaamijyada Diiwaangashan ee Carruurta Da'da Dugsiga ee u adeega carruurta fasalka 1-aad ilaa 13 jirka ah, waxay siiyaan dhalinta hawlo kobcineed kuwaasi oo ka baxsan manhajka mana beddelaan daryeelka barbaarinta ee waalidka. Wixii ah macluumaad dheeraad ah ama si aad u go'aamiso haddii barnaamijkaaga ay tahay in la Diiwaangaliyo, la xiriir Xafiiska Daryeelka Ilmaha 1-800-556-6616 ama iimeyl ugu dir childcare.emp@state.or.us

Ciyaaraha & Xiisadaha

S1: Sidee ayey kooxaha ciyaaruhu u "wadaagi" karaan qalabka?

J1: Koox tiro sugan oo carruur ah (hal guuto) iyagu dhexdooda qalabka way wadaagi karaan (sida 5 iyo 5 kubadda kolayga). Lama wadaagi karaan qalabka koox kale oo tiro sugan oo carruur ah waana in qalabka maalin kasta la nadiifiyo marka la isticmaalo.

S2: Miyey kaamamka ciyaaraha dhalinta, barnaamijyada dhalinta, casharrada dabbaasha iyo xiisadaha jidh-dhisku, leeyihiin tilmaamo la mid ah kuwa kaamamka maalintii ee xagaaga ee carruurta da'da dugsiga?

J2: Kaamamka ciyaaraha dhalinta, barnaamijyada dhalinta, casharrada dabbaasha iyo xiisadaha jidh-dhisku waa inay raacaan [Hagitaanka Kaamamka Maalintii ee Xagaaga ee Carruurta Da'da Dugsiga](#), iyadoon la eegayn deegaanka kaamka.

S3: Miyey guutooyinka bannaanku ay tahay inay galaangal u yeesheen xamaamyadooda gaarka ah toddobaadkii, sida kiraysiga musqulaha la qaadi karo?

J3: Guutooyin badani way isticmaali karaan xamaamyo la wadaago, laakiin waa in kolba koox kooxaha tirada sugan ah ay isticmaasho xamaamyada. Dhaqanada nadiifinta waa in la raaca kadib marka ay koox isticmaasho goobahan iyo kahor inta aysan koox kale isticmaalin.

S4: Marka la joogo beerta Portland Parks and Recreation oo gacmo dhaqistu ay ku yar tahay, miyay ardayda kaamku wali u baahan yihiin inay gacmaha dhaqaan baddalka gacmo nadiifiyaha?

J4: Iyadoo la raacayo [hagitaanka OHA](#), kaamamka waa inay bixiyaan gacmo dhaqid iyo tas-hiilaad, softiyo, iyo weelalka qashinka oo si fudud loogu heli karo carruurta iyo shaqaalaha labadaba.

S5: Miyaa qalabka ciyaaraha sida kubbadaha, ulaha taniska, xarkaha, iwm. ay wadaagi karaan kooxda tirada sugan iyada oon la nadiifin isticmaalada dhexdooda? Maxaanu u isticmaali karnaa milan nadiifineed oo ilmaha aan dhib u lahayn ahaan oo loo adeegsado qalabka ay wadaagaan kooxuhu (ama ardayda isla kooxda ah dhexdooda?).

J5: Iyadoo la raacayo [hagitaanka OHA](#), hadday suurtagal tahay, magacaw qalab (tusaale ahaan, agab farshaxan, kubadaha qalabka muusikada, goloofisyo, iwm.) oo kaliya loogu talagalay isticmaalka hal koox oo nadiifi inta u dhexeysa waxqabadyada ama adeegsiga. Haddii qalabka ay tahay in ay wadaagaan kooxuhu, waa in la nadiifiyaa ka hor iyo ka dib marka ay adeegsadaan koox xasilloon. Jeermis-dile kujira [liiska ay anixisay Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka \(Environmental Protection Agency, EPA\)](#) waa in loo isticmaalo nadiifinta qalabka ay wadaagaan kooxaha/ardaydu.

Qeexista Erayada

S1: Ma sharrixi kartaa faraqa u dhexeeya guutooyin iyo kooxo tiro sugan? Kuwani ma waxa loola jeedaa isla hal shay?

J1: Haa, koox sugan oo ah 10 carruur ah waxa loo tixgaliyaa inay yihiin guuto 10 carruur ah.

S2: Miyay kooxda tirada sugan ee 10-ka qof ka kooban dhaafi kartaa xadka ah 25? Si kale aan u dhige eh, marnaba caadi miyey tahay in kaamka ay joogaan 26 qof oo isku hawl ku qabanaya barxad isku mid ah iyadoo laga soo qaadayo inay jirto barxad ku filan?

J2: Haa. Ilaa iyo inta ay jirto barxad ku filan oo buuxinaysa shuruudaha barxadda oo kooxaha tirada suganna ayna wax isla cunayn, isla isticmaalayn suuliyada, ama iskala qaybqaadanayn hawlaha dhexdooda isla wakhti, kaamku wuxuu yeelan karaa kooxo tiro sugan oo badan oo isku noqonaysa 26 qof ama ka badan. Hase yeeshee, hawluhu waa inay ka dhacaan kooxda tirada sugan dhexdeeda oo kooxaha tirada sugan waa inayna isku qasmin. Sidaa darteed, masaafada u dhaxaysa kooxuhu waa inay ku filan tahay inayna isku qasmin.

S3: Sidee ayaanu u kooxayn/wax uga qaban karnaa carruurta bixiyayaasha daryeelka daruuriga ah?

J3: Ma jirto shardi dhigaya in kaamamka xagaagu ay ahmiyad gooni ah siiyaan carruurta shaqaalaha daruuriga ah. Carruurta waa inaan loola dhaqmin ama gaar looga soocin carruurta kale ee kaamka.

S4: Fadlan si faahfaahsan u sharrax “kooxaha tirada sugan ee 10-ka qof ka kooban” iyo haddii kooxdu qaadan karto ilme haddii kooxdu ka yaraato 10. Haddii ay sidaas tahay, goorta iyo inta inteer. Haddii ay toddobaadle tahay, maxaa lagu qeexayaa toddobaad, bilawga iyo dhammaadka iyo inta maalmood.

J4: Kooxda tirada sugan ee 10-ka qof ah waxay ka dhigan tahay in 10 carruur ah oo aan isbaddalayn ay kooxda kujiraan maalin kasta ee kaamka. Waa in shaqaaluhu noqdaa mid ku nagaanaya isla kooxda 10-ka carruur ah ilaa intii suurtoagal ah. Kooxda tirada sugan way isbaddali kartaa bilawga toddobaad kasta ee cusub ee barnaamijka (Isniin, haddii shaqadu socoto Isniin-Jimce). Carruurta laguma dari karo koox haddii haddii ilme uu xanuun ku maqan yahay ama ka maqnaado kaamka dhawr maalmood.

S5: Haddii arday uga maqnaado kaamka wax aan xanuun ahayn oo uu maalinta xigtana soo laabto, wali ma loo tixgalinayaa inuu kamid yahay kooxda tirada sugan?

J5: Haa, laakiin ilmuhu waa inuu ku soo laabto kooxda tirada sugan ee uu markii hore ka tirsanaa. Lama oggola inuu ilme kale baddalo ilmaha maqan inta uu maqan yahay (sida, kooxda tirada sugan sagaal (9) way ahaan kartaa maalin qudha).

S6: Si ay wax u yara caddaadaan, miyay “barxadi way qaadi kartaa laba (2) guuto maalintii” (fiiri qaybta kala fogaanta dadka) khusaysaa keliya kaamamka maalinta barkeeda ah, mise waxay khusaysaa barnaamijyada kaamka ee maalinta oo dhan ah?

J6: Qodobkan waxa loogu talagalay kaamka maalinta barkeed ah. Kooxaha kala duwan waxay wada isticmaali karaan tasiilaadka (sida, suuliyada) haddii la nadiifiyo marka kooxi isticmaashaba.

S7: Erayga “waa in” ayaa in badan lagu isticmaalay halkan. Halkaasi si fiican uma cadda. Miyey “waa in” ka dhigan tahay “khasab ah” mise waa “dhici karta” (sida, “booqdayaashu waa inay xirtaan daboolka wajiga.”)

J7: “Waa in” waxay ka dhigan tahay “dhici karta” – marka laga hadlayo waxyaalaha lagu talinayo, laakiin aan shardi ahayn. “Khasab” waxay ka dhigan tahay waa shardi in la raaco. Kaamamka waxa loo oggol yahay inay hirgaliyaan siyaasado ka xannibaado badan inta hagitaan uu sheegaya.

S8: Miyay xiisadaha qoob-ka-ciyaarka dhalintu raacayaan hagitaanka kaamamka maalintii ee xagaaga ee carruurta da’da dugsiga?

J8: Haa. Xiisadaha qoob-ka-ciyaarka dhalinta iyo xiisadaha kale ee dhalinta ee ka qabooma ururada ka shaqaysta jidh-jidhka ee ku yaalo gudaha degmo loo ansixiyey Marxaladda Koowaad waa inay raacaan [hagitaanka kaamamka maalinta ee xagaaga ee carruurta da’da dugsiga](#).

Wax kale

S1: Waadixinta jawaabaha ku saabsan gaadiidka. Sidee kala fogaanshaha 3 fuudh looga dhaqan gelin karaa gaadiidka caadiga ah? Haddii darawalku yahay macallinka kooxda tirada sugan, miyey tahay inay lix (6) fuudh ka fogaadaan?

J1: Maya. Masaaxadda ka-qaybgalayaasha iyo shaqaaluhu waa in ay ogolaataa kala fogaansho jidheed oo saddex (3) fuudh ah oo u dhexeeya dadka.

S2: Ma jiraan xanibaado ku aaddan kaamamka onlaynka ah?

J2: Qof kasta oo kaqaybqaadanaya kaamamka onlaynka ah waa inuu awoodaa inuu jir ahaan ka fogaado lixda (6) fuudh dadka kale.

S3: Waa maxay masuuliyadda sharci ee ururka (barnaamijka dugsiga ha noqdo samofal, macaash-doon, gobolka) saaran haddii ilmahaygu cudurka ka qaado dugsiga? Waa sidee daahfurnaanta macluumaadkaas loo heli karo maadaama aanu ka hadlayno diiwaanka caafimaadka shakhsiyeed ee carruurta?

J3: Tani ma aha su’aal uu gobolku ka jawaabi karo. Waa inaad kala shaqayso ururkaaga fahmidda siyaasadahaoga la xiriira wadaagista macluumaadka.

S4: Halkee ayaanu su’aalaha ku hagaajin karnaa taariikh dambe?

J4: Dhammaan su’aalaha kusaabsan dib u furidda waxa loo diri karaa covid19.reopening@state.or.us. Su’aalahaas dib ayaa loo eegi doonaa waana la tixgalin doonaa marka la soosaarayo lana cusboonaysiinayo Su’aalaha Badanaa la Iswaydiyo ee hagitaanka.

S5: Fadlan caddee tilmaamaha/xeerarka gaadiid ku qaadista dhalinta.

J5: Ka-qaybgalayaasha iyo shaqaaluhuba waa in aanay la safrin dadka kale ee ka baxsan kooxdooda xasiloon. Shaqaalaha kaamku waa in ay diiwaan geliyaan magaca kooxda(aha) xasilan iyo shaqaalaha oo ay ku jiraan darawalka, oo ay la socdaan taariikhda iyo waqtiga safarka iyo lambarka gaadhiga/liisanka. Dareewaladu waxa ay qaadi karaan kooxo xasiloon oo badan haddii ay xidhan yihiin maaskaro oo ay gacmaha jeermiska ka dilaan ka hor intaysan baabuurka ku qaadin koox kasta oo xasiloon iyo kadib markay qaadaan. Gawaadhida waa in la nadiifiyaa inta u dhaxaysa koox kasta oo arday iyo shaqaale ah iyada oo la raacayo [tilmaamaha gaadiidka](#). Maya. Masaaxadda ka-qaybgalayaasha iyo shaqaaluhu waa in ay ogolaataa kala fogaansho jidheed oo saddex (3) fuudh ah oo u dhexeeya dadka.

S6: Waa maxay nooca daboolka wajiga ee ay tahay inay ardayda iyo shaqaaluhu u xirtaan Kaamamka maalinta? Miyey tahay inay barayaashu haystaan difaaca wajiga?

J6: Macluumaadka kusaabsan afsaabka iyo daboolka wajiga ee ardayda iyo shaqaalaha waxa laga heli karaa [Hagitaanka Afsaabka iyo Daboolka Wajiga ee loogu talagalay Ganacsiga, Gaadiidka, iyo Dadwaynaha](#). Sida ay dhigayaan hagitaanada OHA, caruurta ka weyn da'da 2 sano ayaa laga yaabaa inay xirtaan maaskarada wajiga haddii kormeer dhow uu la yeesho qof weyni. Caruurta da' kasta ha ahaadaan waa in aanay xidhan maaskarada wajiga:

- Hadday qabaan xaalad caafimaad oo ku adkaynaysa inay neefsadaan iyaga oo xidhan maaskarada wejiga;
- Haddii ay qabaan naafo ka hor joogsanaysa inuu xirto qofku daboolka wejiga;
- Haddii ay awoodi waayaan inay isaga saaraan maaskarada wejiga si madax banaan; ama
- Marka ay hurdayaan.

Maaskarada wejiga loogama baahnaan karo in carruurta adeegsato mana aha inay ka mamnuuco ama ka hor istaagto helitaanka tilmaamaha ama nashaadaadka.

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa dukumiintiyada qaabab kale ah sida luqadaha kale, daabacaad ballaadhan, farta indhoolayaasha ama qaab aad adigu doorbidayso. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabtid, fadlan kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.